


FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 9-aad. Garowe 15. August . 2007

Lam. 8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudhiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qeybta Koowaad

Sharci

Qeybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, fidheh IWM.

Sharci Lr. 13 ee 11/08/2007, kuna saabsa Qanuunka Ansixinta 3-Degmo
Bogga 187-189.

DAWLAD GOBOLEEDKA
PUNTLAND EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

Sharci Lr.13 ee 11/08/2007, kuna saabsan Sharciga Ansixinta Degmooyinka kala ah Godob-Jiiraan oo ka tirsan G.Nugaal, Degmada Kalabeyr oo ka tirsan G.Sool, Degmada Xarfo oo ka tirsan G.Mudug .

Madaxweynuhu

- Markuu arkay : Dastuurka DGPI qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad.
- Markuu arkay : Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/085/2007 ee 11/07/2007.
- Markuu Garowsaday : Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.

Wuxuu soo saaray

Sharcigan soo socda:-

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad qaanuunka Ansixinta 3-Degmo.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah waa la keydinayaa.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta uu faafinta Rasmiga ah ee Dowlada ku soo baxay, kaasoo kamid noqonaya qawaaniinta Dowlada, Cidkastana ay waajib ku tahay inay dhowrto kuna dhaqanto.

Wabilaahi Towfiiq

Mudane Maxamuud Muuse Xirsi

Madaxweynaha Dowlada



Golaha Wakiillada

Representative Council

Xafiiska Guddoomiyaha

Ref:- XGGW/DGPL/ 85 /2007

11/07/2007

Ku:- Madaxweynaha DGPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta 3 Degmo oo Cusub

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

- MARKUU ARKAY:- Dastuurka DGPL
- MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Golaha Xukuumadda Xeer Madaxweye Lr:- 24 ee 22/02/2007 kuna saabsan 3-da Degmo ee kala ah, Godob jiraan, Kala-Bayr iyo Xarfo.
- MARKUU TIXGELIYEEY:- Baahidda loo qabo Ansixinta 3-dan Degmo ee Cusub.
- MARKUU DHEGEYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DGPL
- MARKUU ARKAY:- Ansixinta Golaha Wakiillada DGPL

Wuxuu Guddoomiyey:-


Ansixinta 3 Degmo ee cusub, kuwaasoo kala ah:-

1. Degmada Godob-jiiraan oo ka tirsan G/Nugaal
2. Degmada Kala-bayr oo ka tirsan G/Sool
3. Degmada Xarfo oo ka tirsan G/Mudug.


Wabillaahi Towfiiq

188

Axmed Cali-Xaashi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
OFFICE OF THE
PRESIDENT

Ref: MW/ DPS/ 53 / 07

FILE No: 1

FEBRUARY 23, 2007

Ku : Guddoonka Golaha Wakiilada DGPL

Ujeedo : Oggolaansho 3 degmo oo cusub


Tixraac : Go'aanka Golaha xukuumadda, shirkiisi
Khamiis, February 22, 2007

Tixraac : Xeerka Madaxweyne Lr.24 ee February 23, 2007

Waxaan Golaha Wakiilada ee sharafta leh u soo gudbineynaa xeerka la tixraacayo kuna saabsan Golaha xukuumadda oo ansixiyey magacaabidda 3 degmo cusub oo kala ah :

- 1-Degmada Godob-jiraan oo ka tirsan gobolka Nugaal
- 2- Degmada Baaraan (Kala-bayr) oo ka tirsan gobolka Sool, iyo
- 3- Degmada Xarfo oo ka tirsan gobolka Mudug

Haddaba waxaa Golaha Wakiilada DGPL laga codsanayaa in 3da degmo ee cusub la oggolaado.


Maxamuud Muuse Hersi
Madaxweynaha Dowladda Puntland

